**Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

**Hadal-qoraaalka kalfadhiga 4aad**
**Documentiga Kulankii 23aad** **Taariikhda: 06/05/2014**

---

**Kalfadhga 4aad**
**Kulankiisii 23aad**
**Saacada la furay: 11:00 am**
**Saacada la xiray: 1:45 pm**
**Guntanka: 153 xildhibaan**

**Ajendaha**

1. **Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **Dooda Miisaaniyad Sanadeedka 2014ka**

**Shir-Guddoonka:** Guddoomiye Ku-Xigeenka 2aad ee golaha shacabka JFS, Mudane Mahad Cabdalla Cawad

Waxaa shirka furey Guddoomiye Ku-Xigeenka 2aad, Mudane Mahad Cabdalla Cawad, waxaana lagu furey Aayadaha Quraanka Kariimka ah uuna Akhriyey Xildhibaan Sheekh Shaacir. Kadib, Guddoomiyaha wuxuu sheegay in manta u marti u yahay Golaha Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Maaliyadda Mudane C/llaahi iyo Agaasimaha Guud Aamina iyo Agaasimaha waaxda Miisaaniyadda Iraad.

**Guddoomiyahu** wuxuu sheegay in Guddiga Maaliyadda ay soo shaqeeyeen mudo badan oo ay wax bandanna kasoo diyaariyeen Miisaaniyadda. Wuxuu intaa ku daray inuu rajeynaayo in ay isku soo afgarteen Guddiga iyo Wasaaradda Maaliyadda sida loo dhameystiri lahaa Miisaaniyadda. Wuxuuna soo qaatay Qod 68-aad Farqadiisa 13-aad ee dastuurka in Golaha loosoo bandhigayo hadii qabyo

qoraal la'ansixin waayo dib ayey u dhaceysaa waxayna isku soo afgarteen in Xaaladaha lagu jiro Golaha ay mar hore ka gudubtay.

Wuxuuna soo jeediyey in Guddoohameystiri lahaa Miisaaniyadda, wuxuuna soo qaatay Qod 68-aad Farqadiisa 13-aad ee dastuurka in Golaha loosoo bandhigayo hadii qabyo qoraal la'ansixin waayo dib ayey u dhaceysaa waxayna isku soo afgarteen in Xaaladaha lagu jiro Golaha ay mar hore ka gudubtay, wuxuuna soo jeediyey in Guddoonka Golaha usoo jeediyaan, wuxuuna u yeeray Guddoomiyaha Guddiga Maaliyadda Sheekh Aadan Maxamed Deer si uu usoo bandhigo warbixinta ay soo qoreen.

**Xildhibaan Sheikh Aadan Maxamed Deer** wuxuu sheegay in Guddigu ay soo shaqeeyeen Mudo badan ayna isku afgarteen Wasaarada Maaliyaddu wixii caqabado ay eek u jira Miisaaniyadda, wuxuuna sheegay si tafatiran u sheegi doono Xil. Dr. Cilmi.

**Xildhibaan Dr. Cilmi** wuxuu sheegay in Goluhu ay horey u heesteen Miisaaniyadda uuna taaban doono meelaha kharashaadka wax iska badalay oo inta badan doodu ka taagneyd. Bogga 8-ad dhimis kharash guud iyo gunnooyinka Siyaasiyiinta. Guddigu markuu dib u eegis ku sameeyey xaalada Dalka uu marayo iyo daruufaha adag ee lagu jiro waxaa usoo ifbaxday in la dhimo Xisaabaadka Miisaaniyadda Qaarkood sida aad ku arkidoontaan Jaantuska 2-aad, waxaa kaloo soo ifbaxay in loo baahanyahay in lahelo kharashyo Amniga Xildhibaanda taasoo lagu soo biriyey Miisaaniyadda oo aan horey ugu jirin.

In Xildhibaan kasta loo sameeyo min **2 Askari** oo midkiiba qaadanaayo **$200 US Dollar** taas oo ay noqoneysa **239x2x8=$76400000 .** Qod.3-aad Lacagaha laga jarey siyaasiyiinta oo gaareysa **$2.166.000,00 waxaa la go'aamiyey in laga jaro Deynta Xukuumadda lagu leeyahay oo gaareysa $30.000.000,00.** Maadaama 3 rubac sanadeed ay soo hartey wuxuu talo ku soo jeediyey in Miisaaniyadda ansaxinteeda la fududeeyo si Wasaardda Maaliyadda ay u gutaan waajibaadkooda.

**Gudduunka Golaha** wuxuu sheegay in Meesha lagu soo darey hal arin oo ah Xildhibaan kasto uu yeesho 2 Askari oo amnigiisa Ilaalisa .wasaaradda Maaliyadda waxay sheegtay in aysan heynin kharashkaas intaa la eg ay ku tahay mid cariiri ah**.** Miisaaniyadda ay soo diyaarinayaan 2015 ay ku soo darayaan shuruucda iyo Faah-

faahinta Miisaaniyadda**.** Wuxuuna u yeerey Wasiiru–dowlaha wasaaradda Maaliyadda Mudane C/llaahi si uu u soo Jeediyo ra'yigooda.

Wasiirka Maaliyadda wuxuu u mahadceliyey Golaha iyo Guddiga Maaliyadda ee Baarlama-nka sida wanaagsaneyd ee ula soo shaqeeyeen oo sidatan loogu akhriyey Golaha loo soo habeeyey in Xildhibaanadana la tixgeliyo sugidda amnigooda .
Waxay principalka wasaaradda maaliyadda ku dhisantahay Taageeridda Dibadda ,sanadka soo socdana uu sheegay in ay keenidoonaan Miisaaniyad aad u tifaftiran.wuxuuna codsad-ey in Golahu uu ansaxiyo Miisaaniyadda ay u soo gudbiyeen,tankale bogga 7-aad qod.3-aad . Waxaa ku qoran in la bixiyo Gunnadii xildhibaanadii hore 2012 wixii u harsanaa.

**Guddoomiyaha** wuxuu sheegay in Qod.68-aad waqtigiisa la soo dhaafay istiraatiijiyad Mii-saaniyadeedka uu soo mari lahaa.

**Xildhibaan C/llaahi Jaamac** wuxuu sheegay in Caalamka aysan ka jirin meel ay ku kala duwanyihiin laba wasiir. Wuxuuna wasiirka weydiiyey arintaa sida ay u dhacdey?

**Xildhibaan Jaamac** wuxuu sheegey in lifaaqa ugu danbeeya miisaaniyadda hadda dib loo soo habe-eyey ay ku qoarantahay in ciidamada tiradooda ay tahay 29.740 Askari. Wuxuu weydiiyey in askartaas laga soo qorey 18ka Gobol ee dalka iyo la keeno tiradda Ciidamada oo rasmi ah Iyo darajadooda Mushahaarkooda iyo Raashinkooda.

**Guddoonka** wuxuu weydiiyey Wasaaradda Maaliyadda iyo Guddiga Maaliyadda ee Baarla-manka in ay jawaab u hayaan arinkaan Ciidamadda iyo inkale. Markuu ogaadey in aan jawaab loo haynin ayuu sheegay in dib ay ka soo ogaadaan Guddiga Maaliyadda Baarlama-nka iyo Wasaaradda Maaliyadda iyo Guddiga Difaaca Qaranka Baarlaamanka.

**Xildhibaan Faarax Cawad** wuxuu sheegay in hay'adda arimaha bulshada sida Caafimaadka Waxba-rashada loo bahnaa in loo kordhiyo Miisaaniyadooda. Wuxuu soo jeediyey in la fasaxo Mii-saniyadda 2014ka.

**Xildhibaan Ubax Tahliil**,waxay soo jeeisey in la fasaxo Miisaaniyadda iyo in la caddeeyo Tiradda Ciidamadda Xoogga.

**Xildhibaan Xiddig** wuxuu sheegay in Miisaaniyadda meel loo celiyo ay jirin dalkana dhibka uu ku jiro in laga qaado ayaa la rabaa .wuxuu soo jeediyey in la ansaxiyo Miisaaniyadda lana howlgeliyo Guddiga Difaaca.

**Xildhibaan C/fataax** wuuu soo jeediyey in la soo caddeeyo Min Askari ilaa Generaal waxa ay qaataan .

**Xildhibaan Saaqo** waxay sheegtay in ay aad ugu adagtahay in la yiaahdo wasiiradda lacagta halaga jaro.

**Xildhibaan suge** wuxuu ka codsadey Guddoonka in Miisaaniyadda cod la geliyo.

**Xildhibaan C/naasir Gaarane** wuxuu sheegay in criteria da Ciidamadda in lagu soo cadeeyo Misaaniyadda, wuxuuna soo jeediyey in la ansaxiyo Miisaaniyadda lana howlgeliyo 2-da Guddi iyo Wasaaradda Maaliyadda.

**Xildhibaan Muuse** wuxuu sheegay in shacabka loo daneeyo ,maxaa kalifay in adeega Maamulka uu kabato adeega bulshada . wuxuu soo jeediyey in Dalka uu yeeshaa Currency shillin Soomaali laguna sheego Miisaaniyadda Dalka. Arinta ciidamadana way soo noq-noqotey Taasna waa in xal loo helaa. Xil. C/Kariin wuxuu sheegay in Miisaaniyadda si wanaagsan loogu soo shaqeeyey,wasiiradda qaabka loo kala saarey ma aha qaab dowladeed, waxaana halkaa ka muuqdo in lakala yahay laba dowladood.

**Guddoonku** wuxuu sheegay in shillin Soomaaligu uu ku jiro arinka Siyaasadda. Wuxuuna soo jeediyey in loo daayo dadka ku shaqada lahaa oo iyagu ay soo diyariyaan.

**Xildhibaan Cabdiwali Sh. Muudeey** wuxuu sheegay in Miisaaniyadda si wanaagsan loogu soo shaqeeyey, wasiirada arimahoodana waa laga Hadley qaabka Gunnooyinkooda loo soo habeeyey wuxuuna sheegay inaysan sax ahayn.

Tankale in la keeni waayo Catagoriyada Ciidamadda waxaa sabab u ah, darajada Ciidamada ay wataan ma aha mid Sax taasi ayaa kalifeysa in la helo Tira sax ah iyo Darajo Sax ah, waxa keenayo madmadowgana waa taas. Sababta keentay in shaqaalaha mushahaarkooda ay waayaan muddo seddex bilood maxay tahay? Taas ayaa u baahan in laysweydiiyo.

***Xildhibaan Cabdisamad*** wuxuu sheegay stage uu Miisaniyadda taaganyahay waa stagekii ugu danbeeyey, wuxuu soo jeediyey Inla fududeeyo lana ansaxiyo.

**Guddoonka** wuxuu sheegay in Xildhibaanku hadalkiisu uu qeymo ka leeyahay Golahu wax buu toosiyaa, wax buu ka bedelaa recordna way galayaan.

**Xildhibaan Fanax** wuxuu soo jeediyey in Miisaaniyadda la ansaxiyo, Ciidanka Dowladda lacagta ay qaataana in shaki la geliyo ma aha.wuxuu soo jeediyey in guddi loo xilsaaro si arinkaan ay wax ugu soo qabato ayna dabagalna ku sameeyaan.

Guddoonku wuxuu sheegay, wixii la dhihi lahaa in la yiri, wixii la sixilahaa in la saxay, wuxuu soo jeediyey in cod la geliyo Miisaaniyadda. **Guddoonku** wuxuu sheegay in ay fadhiyaan 92 Xildhibaan taasna Miisaaniyad laguma ansixikaro waa in la helaa quorum buuxa.

**Shir-gudoonka Guddoomiye ku-xigeenka 2aad, Mudane Mahad Cabadalla Cawad oo shir-guddoominaayey kalfadhigii 4aad Kulankiisii 23aad wuxuu sheegay in shirka xiranyahay saacadu markey aheyd 1:45 pm.**